

**BAAQ NABADEED Kasoo Baxay Culimaauddinka dalka Mareykanka oo ku wajahan beelaha ku dagaalamaya Killilka 5aad.**

---

**CULIMAAUDDIINKA SOOMAALIYEED, EE**

**DALKA MAREYKANKA**

**July 19, 2005**

Minnesota, USA

[xasanjaamici@yahoo.com](mailto:xasanjaamici@yahoo.com) (612) 242-3273

[burdhinle@yahoo.com](mailto:burdhinle@yahoo.com) (612) 360-3182

[shabraahin@yahoo.com](mailto:shabraahin@yahoo.com) (612) 558-5389

Shir balaraan oo aay isugu yimaadeen culimaauddiinka Soomaaliyeed ee ku nool dalka Mareykanka ayaa lagu lafa gurey xaalada dagaalada ka soo cusboonaaday deegaanada killilka 5aad ee u dhaxeeya beelaha, Soomaaliyeed ee walaalaha ah ee carigaas wada daga.

“Anagoo ah culimaa’udiinka Soomaaliyeed ee deggen dalka Mareykanka waxaan baaq nabadeed usoo jeedinaynaa dhammaan shacabka Soomaaliyeed meel kasta ay joogaanba. Waxaan shacabka soomaaliyeed ugu baaqeynaa inay ka shaqeeyaan nabadeyn ta Soomaaliya iyo ka hortagga colaadda si loo soo celiyo walaalnimada iyo midnimada shacabka soomaaliyeed oo mudaba maqneyd.

Waxaan halkaa baaq nabadeed gaar ah u jeedinaynaa walaalaha soomaaliyeed ee maalmihii ugu dambeeyay ku dagaalamayay deegaanada kellinka 5aad waxaan usoo jeedinaynaa labada beelood ee walaalaha ah in dagaalka ay si dhaqso ah u joojiyaan oo ay wada hadal ka yeeshaan waxyaabaha ay kala tirsanayaan, waxaan kaloo u sheegaynaa in dagaalku uu adduun iyo aakhiroba khasaare yahay, dad kudhintaa mooyee aysan cidi ku dhalan.

Anagoo ah, Culimaa’udiinka waxaan aad uga xunahay dhiiga ku daadanaya (sida sharci darada iyo micno darada ah ee aan waafaqsanayn shareecadeena suuban), sidaa darteed waxaan ku baaqaynaa in qof dhintay uusan soo noqonayn ee labadbaadiyo dadka haatan nool, beelaha dagaalamayana ay aqbalaan baaq nabadeedkaan, wixii khilaafad ahna lagu xaliyo nabad iyo wada xaajood.

---

Waxaan sidoo kale ugu baaqeynaa dhammaan shacabka Soomaaliyeed inay Ilahay ka cabsadaan xusuustaan walaalnimada Islaamka ee ka dhaxaysa, gacanna ka geystaan hirgalinta nabadda iyo ka hortagga colaadaha dhexmaraya ummadda walaalaha ah.

SI GAAR AH, WAXAAN U SOO JEEDINEYNAA TALLAABOOYINKAAN IN DEGDEG LABADA BEELOOD U FULIYAAN:

1. In si shuruud la'aan ah loo joojiyo dagaalada soconaya.
2. In la furo wada xaajood si loo xaliyo khilaafadka jira.
3. In wadada la qaadayaa noqoto 'Shareecada Islaamka'; si deg deg loogu taago tiirarka nabadda loona hakiyo colaadda.
4. In dhaqso loo joojiyo hurinta iyo taakulaynta dhiilada colaadda. Lana ogaado lacagta lagu bixinayo hurinta dagaalku iney tahay midaan waafaqsaneyn shareecada Islaamka. Ciddii bixisana uu Ilaahey aakhiro kula xisaabtamayo.
5. In sidoo kale, dhaqso loo joojiyo dilka xaq darrada ah, lana ogaado dembiga weyn ay leedahay, Ilahay Subxaanahu Wataacaalaa Wuxuu ku yiri Aaayad Qur'aan ah oo loo tarjumi karo:  
Qofkii mu'min si ula kac ah u dilaa **ABAAL MARINTIISU WAA**

- |                                       |   |
|---------------------------------------|---|
| a. Jahannama (Oo lagaliyo)            | d. Ilahay lacnadiisuna way ku dhacaysaa |
| b. Oo uu ku waarayaa                  | e. Wuxuuna u diyaariyey Alle cadaab     |
| c. Ilahay caradiisuna way ku dhacaysa | adag                                    |

---

Sidoo kale Rasuulku Sallallaahu Calayhi Wasallam: wuxuu ku cadeeyey xadiith macnihiisu yahay "Labadii qof oo Muslimiin ah oo iskala horyimaada seef (midba midka kale rabo inuu dilo), kan wax dilay iyo kan la dilayba waa ahlu naar:

6. In waxgaradka labada beelood ee deggen Mareykanka iyo dhinacyada adduunka, ay u diraan guddi nabad raadin goobaha shidada colaadu ka aloosantahay si loogu caqli celiyo walaalaha is-maan dhaafay oo is-dilaya.
7. Culimada iyo cuqaasha waxgaradka beelaha kale ee deriska la ah oo deggen Killilka 5aad: waxaan ka codsaneynaa inay abuuraan guddi nabad-raadineed oo walaalaha kala dhexgala.
8. Wuxuu ka codsaneynaa dawladda dhexe ee Ethiopia iyo maamulka Killilka 5aad inay si deg-deg ah wax uga qabtaan joojinta dagaalkas iyo nabadeynta labada beelood.

## **WAXAA BAAQAAN NABADEED DIRAYA:-**

1. Sh. Xasan Cali Maxamud (Jaamici) Imam St\Paul Minnesota
2. Sh. Cabdiraxmaan Sh. Cumar Axmad-Imam Minneapolis, Minnesota
3. Sh. Cabdiraxmaan-Shariif Muxammad Ibrahiim-Imam Minneapolis, Minnesota
4. Sh. Axmad-Taajir Sh. Cumar-Imam Minneapolis, Minnesota
5. Sh. Ibraahim Sh. Muxammad-Imam Washington-Seattle
6. Sh. Axmad Muxammad Buraale-Imam Minneapolis, Minnesota
7. Sh. Cabduraxmaan Maxamad Cumar-Haaguf-Imam Minneapolis, Minnesota
8. Sh. Maxamad Sh. Rashiid-Imam Mankato, Minnesota
9. Sh. Sacad Muuse-Imam Minneapolis, Minnesota
10. Sh. Abdulqadir Macallim Xuseen
11. Xaaji Abuubakar Sh. Axmad Xaydar
12. Sh. Axmad Nuur Shiikh Cabdi Foollo
13. Shariif Cabdulcaziiz Sayid Axmad-Imam Minneapolis, Minnesota
14. Sh. Muxammad Sh. Xasan
15. Sh. Cabdullaahi Sh. Xuseen
16. Sh. Xasan Cabdullahi Xuseen
17. Sh. Cabduraxmaan Mucallim
18. Maxamuud Shaafi Cali
19. Sh. Siidoow Cabdi Shariif Muxammad-Imam Minneapolis, Minnesota
20. Sh. Cabdifattaax Sh. Cali Bashiir
21. Sh. Cabdiraxmaan Sh. Ibrahiim Muxammad
22. Sh. Cabdi-Nuur Axmad Cabdille
23. Sh. Cabdifattaax Mursal
24. Sh. Axmad Mucallim Dayyib-Imam Minneapolis, Minnesota
25. Mustafa Muxamad Ibraahim
26. Sh. Shaafi Xuseen
27. Sh. Cabdullahi Cabdi Maxamuud (Maalinguur) -Imam Minneapolis, Minnesota
28. Cabdisamad Xuseen CabdiNaasir
29. Shariif-Maxamuud Shariif-Cali-Imam Minneapolis, Minnesota
30. Sh. Muxamad Cabdullaahi Muxammad-Imam Virginia-Richmond
31. Sh. Cabdisalaam Shariif-Cali Aadam-Imam Minneapolis, Minnesota
32. Sh. Muxammad Xanafi Maxamuud
33. Sh. Cabdiraxmaan Sh. Ismaaciil (Abuu Turaab) -Imam Minneapolis, Minnesota
34. Sh. Muxamad Khadar—Imaam- California-San Diego
35. Sh. Cabdirazak Xaashi—Imaam- Boston
36. Sh. Cabdishakuur Ibraahim—Imaam- Nashville
37. Sh. Aadam sh. Cabdullaahi Imaam-Ohio
38. Sh. Cabdinuur Xasan -Imam Portland-Maine
39. Sh. Muuse Cumar axmad -Imam Ohio-Columbus
40. Shariif-Haashim Shariif-Cabdinaasir-Imam Fargo, North Dakota
41. Sh. Cumar-Faqiij Sh. Xasan-Cadde Fiqi Imaam-Minnesota

Guud ahaan waxaan umadda Soomaaliyeed Ilaahey uga baryeynaa inuu ka dhigo kuwii nabad ku wada noolaada, kuna dhaqma shareecada Islaamka, weyneeyana walaaltinimada Islaamka.

Wabilaahi Tawfiiq